



Faafreebka New Zealand

Ku mahadsanid aqrinta macluumaadkeena ku saabsan faafreebka oo Af Soomaali ah. Waxaan filaynaa in macluumaadkan uu ka jawaabayo su'aalahaagii ku saabsanaa faafreebka halkan ee New Zealand.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan faafreebka taleefishinka ama raadiyaha, fadlan ka eeg website-ka ama bogga Hay'adda Qiyaasta Warfaafinta (Broadcasting Standards Authority) – www.bsa.govt.nz.

SHARCIGA FAAFREEBKA EE NEW ZEALAND WAXAA LOO YAQAAN SHARCIGA KALA-SAARIDDA FILIMADA, FIIDIYOWYAASHA IYO DAABACADAHA 1993 (THE FILMS, VIDEOS AND PUBLICATIONS CLASSIFICATION ACT 1993)

Sharcigu wuxuu u ogolaanayaa Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta (Office of Film and Literature Classification) inuu kala saaro waxyaalaha sida filimada, DVD-yada, buuggagta, videogames-ka, wargeysyada iyo faylasha kombiyuutarada. Filimadu waxay u baahan yihiin inay lahaadaan magacyo kala-saarid dusha uga qoran halkan New Zealand oo rasmi ah si loogu iibiyo, kireeyo, ama lagu soo bandhigo New Zealand.

Sida uu Sharciga Faafreebku U-saameeyo Adiga iyo Qoyskaaga

Sharciga Faafreebka ee New Zealand wuxuu kaa caawinayaa inuu qoyskaaga ka ilaaliyo waxyaalaha waxyeelada leh.

WAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO SHARCIGA FAAFREEBKA

- Waa sharci darro in la siiyo DVD-yada iyo videogames-ka mamnuucan dadka ka yar da'da ku xusan calaamadda kala soocidda .
- Waa sharci darro in dadka da'da yar la siiyo DVD-yada iyo videogames-ka, buuggagta, wargeysyada, ama faylasha kombiyuutarada xataa haddii waxyaalaha da'da ku-xiran aysan lahayn magacyada kalasaaridda oo ku dul-qoran.
- Waa sharci darro in la siiyo DVD-yada, buuggagta, wargeysyada, ama faylasha kombiyuutarada dadka ka yar da'da 18.

Ka aqri hoos warbixinnada ka [Waxyaalaha da'da ku-xiran](#).

MAGACYADA KALASAARIDDA CASAANKA AH WAA XADAYNTA DA'DA OO SHARCIGA AH

Midabyada magacyada kala-saaridda waa sida nalalka gaadiidka kala haga oo kale:

- CAGAAR macnahiisu waa qof kasta wuu daawan karaa filimka.

- JAALAHA macnahiisu waa qof kasta wuu daawan karaa filimka, hase ahaatee filimku waxaa dhici karta inuusan ku habboonayn daawadayaasha qaarkood.
- CASAAN macnahiisu waa filimku waa mid da'da ku-xiran. Waa inaad filimka daawadsiin dadka da'doodu ka yar tahay qoraalka filimka ku dul-qoran.

Qoraalka qeexaya magaca kala-saaridda wuxuu kuu sheegayaa waxa ku jira filimka. Waxan ku jira filimka way ka caraysiin karaan ama u gafi karaan dadka qaarkiis.

Magacyada kala-saaridda




G – filimku waa ku habboon yahay cid kasta.



PG – qof kasta wuu daawan karaa filimka. Hagista (nasteexada) waalidka ama qof weyn oo masuula ayaa lagu talinayaa inay jiraan haddii carruur da' yar ay daawanayaan filimka.



M – qof kasta wuu daawan karaa filimka. Filimku wuxuu ku habboon yahay dadka da'doodu ka weyn tahay 16 sano jirro.



RP13 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 13 sano jirro inuu la socdo qof weyn oo masuula mooyee.



RP16 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 16 sano jirro inuu la socdo qof weyn oo masuula mooyee.



R13 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 13 sano jirro.



R15 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 15 sano jirro.



R16 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 16 sano jirro.



R18 – waa sharci darro in filimka la daawadsiiyo dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano jirro.

IIIBINTA DVD-YADA

Waxaad u baahan tahay inaad hesho magacyada kala-saaridda ee DVD-yadada haddii aad doonaysid inaad DVD-yo ku iibiso New Zealand. Waxaa lagu ganaaxi karaa ilaa \$3,000 ku-iibinta DVD-yada kuwaas oo aan lahayn magacyada kala-saaridda ku-dul-qoran ee New Zealand.

Waxyaalaha da'da ku-xiran iyo kuwa sharci darrada ah

WAXYAALAHA DA'DA KU-XIRAN

Waxyaalaha filimka ku jira kuwaas oo da'da ku-xiran waxaa ka mid ah:

- Jinsiga (lab & dheddig)
- Cabsida
- Dhaqanka dambiga iyo khatara ah
- Naxariis-darada
- Rabshada
- Luqadda aadka u xad-gudubka ah
- Is-daldalid ama waxyeellayn nafta

WAXYAALAHA SHARCI DARRADA AH

Waxyaalaha filimka qaarkood ayaa mar kasta ka ah sharci darro halkan New Zealand:

- Waxyaalaha galmada oo ay ku jiraan carruurta
- Waxyaalaha dhiirigeliya rabshad galmo iyo jajuubka (qasbidda)
- Waxyaalaha dhiirigeliya jirdilka ama rabshada
- Waxyaalaha galmada ah oo ay xayawaanku ku jiraan
- Waxyaalaha galmada ah oo ay maydadku ku jiraan
- Waxyaalaha galmada ah oo ay kaadida ama saxarada ku jiraan

Waxyaalo kale qaarkood ayaa sharci darro ka noqon karaa New Zealand.

Waxyaalahaasna waxaa ka mid ah kuwa:

- Dhiirigeliya Dhaqanka dambiga ah
- Dhiirigeliya rabshadda
- Dhiirigeliya ku-xad-gudubka galmada carruurta
- Ka-faai'daysta qaawanaanta ilmaha
- Dhiirigeliya asluubta sharaf-rididda iyo takoorka ah

SAMAYNTA WAXYAALAHA SHARCI-DARADA AH WAA DAMBI

Waa dambi in la yeesho, ama intarneedka laga soo-degsado, ama la qaybiyo waxyaalo sharci darro ah. Waxaa lagugu xiri karaa ilaa 14 sannadood yeelashada, ama ka soo-degsadka intarneedka, ama qaybinta waxyaalo sharci darro ah. Ka aqriso [waxyaalaha sharci darrada ah](#) macluumaadka sare oo ku saabsan noocyada waxyaalaha sharci darrada ah.

Nadaamka Faafreebka ee New Zealand

WAX KA BADAN HAL HAYA'D AYAA KA MASUULA FAAFREEBKA HALKAN NEW ZEALAND

Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta

- Waxaan nahay haya'd dowladeed oo madax-bannaan.
- Faafreebaha Guud waa madaxa Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta.
- Waxaan kala-saarnaa waxyaalaha u baahan inay noqdaan kuwo da'da ku-xadaysan ama mamnuuc ah. Wax ayaa noqon kara mid da'da ku-xiran ama mamnuuc ah haddii ay ku jiraan galmo, cabsi, dambi, naxariis-darro, rabshad ama luqad xad-gudub ah.
- Waxaan kala-saarnaa dhammaan filimada da'da ku-xiran, DVD-yada iyo videogames-ka halkan New Zealand.
- Waxaan kaloo kala-saarnaa buuggagta, wargeysyada, faylasha kombiyuutarada, iyo waxyaalo kale.

Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta wuxuu kaloo ka jawaabaa su'aalaha iyo cabashooyinka ka yimaada dadweynaha. Waxaanu cilmi-baaris ku samaynaa arimaha faafreebka. Waxaan kaloo bixinnaa tallooyin lacag la'aan ah, macluumaad iyo xog ku saabsan faafreebka.

Xubnaha dadweynaha waxay ka codsan karaan Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta inuu waxyaalaha kala-saaro – sida buugga ama wargeyska. Hoos ka eeg *Xiriirka Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta* wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helidda kala-saaridda waxyaalaha.

Film and Video Labelling Body (Haya'dda Magac ku-dul-qoridda Filimka iyo Fiidiyowga)

- Waxay kala-saartaa filimada, DVD-yada iyo videogames-ka aan ahayn kuwa da'da ku-xiran.
- Waxay u-samaysaa magac kala-saarid dhammaan filimada iyo DVD-yada.

BOLIISKA, CANSHUURAHA DEKADDA, IYO WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA WAXAY FULIYAAN SHARCIGA FAAFREEBKA EE NEW ZEALAND

Wasaaradda Arimaha Gudaha

Censorship Compliance Unit (Laanta Hirgelinta Faafreebka) ee Wasaaradda Arimaha Gudaha waa haya'dda ugu weyn oo fulisa Sharciga Faafreebka ee New Zealand. Laanta Hirgelinta Faafreebka waxay hirgelisaa kala-saaridda uu go'aamiyo Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta. Laanta Hirgelinta Faafreebka waxay awood u leedahay inay dambi ku-oogto dadka ama haya'daha jebiya Sharciga Kala-saaridda.

La xiriir Laanta Hirgelinta Faafreebka haddii aad u malaynayso in qof ama haya'd uu jebinayo Sharciga Faafreebka. Kala xiriir Laanta Hirgelinta Faafreebka:

- censorship@dia.govt.nz
- 0800 257 887
- www.dia.govt.nz/Services-Censorship-Compliance-Index

Adeegga Canshuuraha Dekadda ee New Zealand

Adeegga Canshuuraha Dekadda wuxuu ka-hortagaa waxyaalaha mamnuuca ka ah inay New Zealand ka soo-galaan wadamada kale. Kala xiriir Adeegga Canshuuraha Dekadda:

- feedback@customs.govt.nz
- 0800 428 786

Boliiska

Boliisku waxay la shaqeeyaan Adeegga Canshuuraha Dekedda iyo Wasaaradda Arimaha Gudaha si loo hirgeliyo Sharciga Faafreebka ee New Zealand. Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir istayshanka boliiska degaankaaga.

Kala xiriir Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta

Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta wuxuu ka warceshaa cabashooyinka wuxuuna ka jawaabaa su'aalaha ku saabsan faafreebka New Zealand. Kala xiriir Xafiiska Kala-saaridda Filimada iyo Suugaanta:

- info@classificationoffice.govt.nz
- 0508 236 767